

Barashada Xirfadaha iyo Shaqada carbinta ee Fasalada 1aad ilaa 12aad

Waxaa la filayaa in macalimiintu la shaqayn doonaan ardayda si ay ooga caawiyaan hormarinta barashada xirfadaha iyo shaqada carbinta ee ku qeexaan shaxanka soo socda Xirfad iyo carbis kasta, shaxanku waxuu ka bixinayaa tusaalayaasha la halmaala shaqooyinka, kaasoo loogu tala galay raacidda macalimiinta nidaamka, qiimaynta guud iyo qiimaynta barashada xirfadaha iyo shaqada carbinta. Tijaabada shaqada waxaa loo qorsheeyay in lagu caawiyo laakiin ma xadidna macalimiinta dadaaladoodu inay ku caawiyaan ardayda si ay u noqdaan arday firfircoon, ooguna kala duwanaadaan heerarka fasalada kala duwan.

Barashada Xirfadaha iyo Shaqada Carbinta ee Fasalada 1aad ilaa 12aad	barashada xirfadaha iyo shaqada carbinta	Tijaabada shaqada
	Mas'uuliyadda	Ardaygu: <ul style="list-style-type: none"> waxu oofin mas'uuliyadaha iyo balamaha goobta barashada gudaheeda; waxuu dhamaystiri oo soo gudbin shaqada fasalka, shaqada guriga, iyo shaqooyinka laysku diro ayadoo loo eegayo xiliga loo qabtay; waxuu qaadaa mas'uuliyadda waxuuna maareeyaa shaqo uu leeyahay.
	Abaabul	Ardaygu: <ul style="list-style-type: none"> waxuu hindisaa oo racaa qorshe waxuuna hirgaliyaa dhameystirka shaqada iyo hawlaha; waxuu aas-aasaa ahmiyado waxuuna maareeyaa xilli lagu dhameystiro hawlaha laguna gaaro hadafyada; waxuu cadeeyaa, aruuriyaa, qiimeeyaa, oo isticmaalaa warbixinta, tiknoolajiyadda, iyo dhaqaalaha si loo dhamaystiro hawlaha.
	Shaqo Madaxbanaan	Ardaygu: <ul style="list-style-type: none"> waxuu si madaxbanaan u daba galaa, u qiimeeyaa, una nakhtiimaa qorshayaasha si loo dhamaystiro hawlaha loona gaadho hadafyada; waxuu qaataa xilliga fasalka si loo dhamaystiro hawlaha; waxuu racaa tilmaamaha leh maareynta oogu yar.
	Iskaashi	Ardaygu: <ul style="list-style-type: none"> waxuu yeelaa doorarka kala duwan iyo cadaaladda ku wadaagidda shaqada koox; waxuu ka jawaabaa si dhamaystiran rayiga, fikradaha, mabdayada, iyo caadooyinka dadka kale; waxuu abuuraa xidhiidh wanaagsan oo isku xidhan asagoo mara shakhsiyaad iyo isku xidhka warbaahinta; waxuu la shaqeeya dadka kale si uu u xalliyo khilaafyada waxuuna abuuraa fikrad guud si loo gaaro hadafyada kooxda; waxuu wadaagaa xogta, xeeladaha, iyo khibrada waxuuna sare u qaadaa fikradaha wanaagsan si loo xaliyo dhibaatooyinka loona go'aan gaadho.
	Hindisaha	Ardayga: <ul style="list-style-type: none"> waxuu raadiyaa oo qabtaa fikrado cusub iyo fursadaha waxbarasho; waxuu muujiyaa awooda wax cusub soo saarka iyo rabitaanka ku dhiiranaanta; waxuu muujiyaa u jeelidda iyo xiisaha waxbarashada; waxuu habeeeyaa hawlo cusub oo leh fikrado xaqiiqo ah; waxuu si haboon u aqoonsadaa ooguna doodaa xuquuqda naftiisa iyo kuwa kale.
	Xeer shakhsi	Ardaygu: <ul style="list-style-type: none"> waxuu dhigtaa hadafyo shakhsiyeed oo u gooni ah waxuuna daba gala hormarka la xidhiidha guusha laga gaaray; waxuu raadiyaa cadaynta ama caawinta mark loo baahdo; waxuu caawiyaa kana fikrad bixiyaa si hufan awoodihiisa, baahiyaha, iyo rabitaanada; waxuu muujiyaa fursadaha waxbarasho, doorashooyinka, iyo xeeladaha si loo gaadho baahiyaha shakhsi loona gaaro hadafyada; wuu u dul qaataa wuuna dadaalaa marka laga hortagayo caqabadaha.